

GUUDMARKA NIDAAMKA DHAGAYSIGA

Hadii dhagaysiga yahay **dhagaysi foolka-fool ah**, dhinacyadu waa inay iska duwaan geliyaan marka ay yimaadaan xafiiska soo dhawaynta ee aaga qolka dhagaysiga ee ku yaal 14th Floor ee Xafiiska Maxkamada Maamulka ugu yaraan 15 daqiiqo kahor wakhtiga dhagaysiga. Waxaa lagugu hagi doonaa qol dhagaysiga oo lagugu qoray.

Hadii dhagaysigu uu yahay **dhagaysi taleefanka ah**, dhinacyadu waa inay iskugu yimaadaan meesha loogu yeedhey Wargelinta Dhagaysiga ugu yaraan 15 daqiiqo kahor saacada dhagaysiga loo mudeeyay. Hadii aad diido dhagaysiga taleefanka oo aad doonayso dhagaysi foolka-fool ah, wargelinta Xaakinka Sharciga ah ee Maamulka (“ALJ”) ee aad dalbatay wakhti kahor taariikhda dhagaysiga. U dir nuqul dalabkaaga ah dhinaca kale.

Hadii dhagaysigu uu yahay taleefanka oo aad doonayso ALJ inuu eego waraaqahaaga, fadlan boosta ugu dir nuqul waraaqaha wakhti kahor dhagaysiga, oo uu la socdo nuqul dhinaca kale ee kaasoo horjeeda ah. Waa inaad boosta ugu dirnaa nuqulada saxda ah, aan ahayn kuwa rasmiga ah, wixii waraaqo ah ee aad u baahanayso kadib dhagaysiga. Waraaqaha la geliyay cadaymaha waa inay ku jiraan faylka kiiska mudada uu socdo rafcaanku oo dhan.

Hadii aad doonayso inaad keento markhaati, markhaatigaaga waxaa uu joogi doonaa qolka dhagaysiga banaankiisa kahor inta aanu bilaabmin dhagaysigu, hadii aad doonayso in markhaatigu uu taleefanka ka dhiibo macluumaadka, u sheeg ALJ dalabkan iyada oo qoraal ah mudo ka hor taariikhda dhagaysiga. U dir nuqul dalabkaaga ah dhinaca kale.

ALJ waxa uu ka dalban doonaa dhinac, caadiga Waaxda Degmada ama Gobolka, inay marka hore keenaan cadaymaha. Dhinacu waa inuu u yeedhaa markhaatiga oo uu soo bandhiga cadaymaha oo u kala horeeya sida ay u arkaan inay u kala horeeyaan dhinacyadu. Hadii dhinacu ka dalbado ALJ inay eegaan wax cadaymo ah oo aan hore loogu keenin ALJ iyo dhinac kasoo horjeeda, dhinacdu waa inuu hayaa nuqulo ku filan marka dhagaysiga la yimaado. Marka dhinacu uu dhamaysto kiiskiisa ama kiiskeeda, dhinaca kasoo horjeeda ayaa lagu soo casuumayaa inay keenaan cadaynta.

Markhaatiyada (oo ay ku jiraan dhinacyada) waxaa dhaarinaya ALJ. Marar badan, dhinacyadu kaliya waxay noqonayaan markhaatiyayaal. Markhaatiga waxaa marka hore su'aalo waydiin doona dhinaca u yeedhey, kadibna dhinaca kale ayaa waydiin doona su'aalo. Dhinaca kale waxa uu fursad u heli doonaa uu ku waydiiyo su'aalo markhaatiga; cida u waydiinaysa su'aalaha dhinaca kale looga ogola inay macluumaad sheegto, ALJ waxay sidoo kale waydiin karaan su'aalo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka dhagaysiga, fadlan ka gal Hearings & Docketing – Boga nidaamyada ee websaytkeena:

<http://www.colorado.gov/dpa/oac> oo raac linkiyada Tilmaamaha Wixii Aan Looyar Ahayn iyo Nidaamyada Guud. Waxa aad sidoo kale heleysaa linkiyada shuruucda hay'adaha ee khuseeya ee kiiskaaga.

Cinwaanka boosta ee Xafiiska Maxkamada Maamulku waa: State Service Building 1525 Sherman Street, 4th Floor Denver, Colorado 80203. Taleefan lambarku waa (303) 866-2000, oo lambarka faakiskuna waa (303) 866-5909.